




Waa maxay SAC?

SAC waxaa loo soo gaabiyey "Kharashka Isticmaalka Bulaacadda".

Gudiga Maamulka Magaalooyinka waxa uu deganayaasha iyo goobaha ganacsiga ka qaadaa lacag hal mar ah oo ah in ay ku xirtaan bulaacadda magaalada (nidaamka bulaacadaha) marka ugu horeysa. Waxaa kale oo suurtagal ah in gudigu lacag dheeraada ka qaado marka ay goobta ganacsigu balaarato ama uu isbedelo isticmaalka dhulkeeda, kaasoo laga yaabo inuu ku abuurdo nidaamka baahi dheeraad ah.

Gudigu waxa uu kharashka SAC ka qaadaa dawladaha hoose, oo iyagana ka qaada ganacsatada ama mulkiilayaasha guryaha. Dawladaha hoose qaarkoodna lacag dheeraad ah ayey ka qaadaan.

Lacagta SAC waxaa kaa qaadaya dawladaha hoose (magaalada).



Maxaan u bixinayaa SAC?

Tubeoyinka qaada bulaacadaga iyo warshadaha sifeeya waa kuwo aad qaali u ah. Waxaanu amaahanaa lacag lagu dhiso si loo balaariyo oo ugu adeegaan macaamiisha iminka jirta iyo mustaqbalka. SAC waxa ay wax ka bixisaa deynta.

Sidee ayaa gudigu ku ogaadaa lacagta aad bixineyso ee SAC?

SAC waxaa lagu qiyaasaa halbeeg.

Guryaha kaligood taagan ee qoysaska = 1 SAC = \$2,485 (2018-2019)



Goobaha aan degaan aheyn waxa ay leeyihiin "hab loo xisaabo" inta ugu badan ee ay ku soo dari karaan bulaacadda ee ay goobtaasi u baahan tahay. Iyada oo ku xiran nooca ganacsiga, waxa suurta gal ah in aad bixiso wax ka badan hal SAC. Tusaale ahaan, makhaayad leh saddex boqol cag laba jibbaaran ka bixineysaa 1 SAC.



SAC waa mid ku saleysan inta ugu badan ee goobtaadu ka isticmaasho bulaacadda ee ka dhalaneysa dhaqdhaqaaqa ganacsi (diyaarinta cuntada, dhaqidida weelasha, nadiifinta dhulka, wax soo saarka, isticmaalka suuliga, iwm.)




Ka soo qaad in aad iibsatay ama aad furatay goob ganacsi oo la mid ah qiyaasta mid horey uga jirtay isla goobtaas. Haddii SAC horey loo bixiyey, waxaa suurtagal ah in aan SAC dheeraad ah lagaa qadin. Inta aadan saxiixin heshiiska kirada, la xiriir Gudiga si ay kuugu eegaan xaaladda SAC ee dhismaha iyo sida aad codsi ku soo gudbin karto.

Soo booqo metro council.org/SACmanual si aad uga ogaato inta SAC ee laga yaabo in aad bixiso.

Ma garanaysaa ?

Sidee ayaan ku codsan kartaa qiimeynta SAC?



Waxaa ka dib kula soo xiriiriya shaqaalaha gudiga maalin gudaheed ka dib marka uu na soo gaaro codsigaaga si aan kuu wargelino in codsigaaga na soo gaaray iyo in kale. Gudigu waxa uu dhameystirayaa qiimeynta laba ilaa sadex todobaad gudahood ka dib marka uu soo gaaro codsiga iyo qoraalada. **Waxa aad ku bixineysaa Lacagta SAC maamulka magaaloyinka taasoo qeyb ka ah ogolaanshaha ganacsiga.**

Lacagta tartiib ma loo bixin karaa?

Haddii aadan bixin karin lacagta SAC oo aadan awoodin

- Waxaa suurtagal ah in aad qaadan karto deynta ganacsatada yaryar loogu talo galay si aad marba qeyb u bixiso lacagta SAC iyo kharashyada kale ee magaalada. Kala tasho bangiga iyo hay'adaha deyn bixinta.
- Waxaa kale oo suurtagal ah in magaaladu dib kuugu dhigto bixinta qeyb ka mid ah kharashka SAC. Weydii maamulka magaalada haddii ay ka qeyb qaataan Barnaamijka Dib Ka Bixinta kharashka SAC.

Su'aalo?

iimeyl SACprogram@metc.state.mn.us ama soo wac [651-602-1770](tel:651-602-1770) si aad ula xiriirto wakiilada SAC.